

Guriyeyn badan oo qiime jaban oo loogu talagalay reer Alberta

Luulyo 24, 2023 [Su'aalaha warbaahinta](#)

Wareegga labaad ee maalgalinta Affordable Housing Partnership Program (AHPP) ayaa u furan dalabyada ka imanaya danwadaagta bulshada si loo taageero hirgalinta guriyeyn casri ah.

Guriyeynta qiimaha jaban waxay awood u siiyaan qoysaska iyo shakhsiyaadka inay u isticmaalaan dakhligooda waxyaalo kale oo daruuri ah oo ay u baahan yihiin iyo inay kor ugu qaadaan tayada noloshooda. Dawladda Alberta waxay maalgalisaa barnaamijyo si ay u hubiso in reer Alberta ay heli karaan guriyeyn ammaan ah, deggan oo qiime jaban.

Maalgalinta wareeggan, dawladda Alberta waxay ku bixinaysaa \$68 milyan si ay utaageerto guriyeyn casriga ah, waara oo qiime jaban oo loogu talagalay dadka saboolka ah ee reer Alberta. Danwadaagta dawladda, ururada aan macaash-doonka ahayn iyo kuwa gaarka ah waxay soo gudbin karaan mashaariicdooda guryeynta qiimaha jaban si loogu maalgaliyo illaa Oktoobar 16.

“Affordable Housing Partnership Program wuxuu xoojiyaa shaqada iskaashiga ku dhisan wuxuuna mudnaan gaar ah siiyaa yoolka xaqiijinta in dhammaan reer Alberta helaan guriyeyn ammaan ah, deggan, oo qiime jaban. La shaqaynta danwadaagteena dawladda hoose, ururada aan macaash-doonka ahayn iyo ururada gaarka ah, waxay noo horseedaysaa xaqiijinta inaanu dhisno guriyeyn qiime jaban oo kala duwan si loo daboolo baahiyaha deegaanka ee dhanka guryaha.”

Jason Nixon, Wasiirka Muwaadiniinta Waayeelka ah, Adeegyada Bulshada

Wareeggii koowaad ee maalgalintu wuxuu xirmay Janaayo, waxaana lagu ansixiyey \$124.7 milyan oo maalgalin ah oo loogu talagalay 30 mashruuc. Barnaamijku wuxuu taageeray in ka badan 1,100 guryaha qiimaha jaban ah oo Alberta oo dhan laga hirgaliyey.

Dhammaan qorshayaasha waxa la qiimayn doonaa iyadoo laga duulayo baahiyaha bulshada deegaanka, awoodda gaarista natiijooyin anfacaya dadka reer Alberta ee saboolka ah iyo muujinta faa'idada cashuurtii cashuur-bixiyaha.

Faahfaahinta ku saabsan mutaysiga iyo hannaanka dalabka waxa laga heli karaa onlayn.

Xaqiiqooyin kooban

- Mashaariic la xusi karo oo lagu fuliyey wareeggii koowaad ee Affordable Housing Partnership Program ee Janaayo waxa ka mid ah:
 - \$15.2 milyan oo lagu bixiyey Dib-u-habaynta Goobta Bridgeland ee Magaalada Calgary
 - \$14.9 milyan oo lagu bixiyey Dib-u-dhiska Lendrum-ka Civida ee Edmonton
 - \$14.7 milyan oo lagu bixiyey Guriyeynta Waayeelka Saboolka ah lagu Hayo ee Meridian Housing Foundation-ka Spruce Grove ee Spruce Grove
- Maalgalinta Affordable Housing Partnership Program ee Alberta waxa lagu bixiyaa heshiiska laba dhinacoodka ah ee 10-ka sano ah ee Istaraatijiyadda Guryeynta Qaranka oo ka dhexeeya dawladaha Canada iyo Alberta.

Macluumaad la xiriira

- [Affordable Housing Partnership Program](#)
- [Istaraatijiyadaha guryeynta qiimaha jaban ee Stronger Foundations](#)
- [Barnaamijyada guriyeynta qiimaha jaban](#)

Warbaahinta kala duwan

- [Daawo shirka jaraa'id](#)